



## **Ardayda Dugsiyada Dadweynaha Portland kuna jira Xaalada Kala-guurka waxa ay hor tageen Xeer-dejiyaasha Oregon si ay cadaymo u siiyaan**

Lix arday oo wax ka barta Dugsiyada Dadweynaha Portland Barnaamijkiisa Xaalada Kala-Guurka waxa ay maalintii Arbacada ahayd ka hor-cadeeyeen Xeer-dejiyaasha Gobolka Oregon, iyaga oo taageero u raadinaya xeer u ogolaan doono in ay ku sii jiraan barnaamijka ka caawiya sidii ay u baran lahaayeen xirfado shaqo si ay u noqdaan xubno bulshada ka mid ah oo wax soo saar leh.

Xeerka 1522 ee Xeer-dejiyaasha wuxuu sixi doonaa cawaaqib-xumadii uu keenay ee aan lagu sii talogalin xeerkaa hore ee SB 20, kaasi oo meesha ka saarayey ardayda qaadata Shahaadada Dugsiga Sarre ee Dib Loo Habeeyey in aanay addeegyada waxbarashada gaarka ah dib loo siin, addeegaasi oo markii hore la siin jiray ilaa iyo inta ay ka gaarayaan da'da 21 sanno. Shaahadada Dib Loo Habeeyey waxa la siiyaa ardeyga dhammeysta 24 dhibcood oo dugsiga sare ah, laakiinse ay tahay sababtoo ah inuu yahay naafo ama ay jiraan sababo kale oo uu ku hanan waayey inuu buuxiyo shuruudihii heerkii waxbarasho ee lagu qaadanayey shahaadada Dugsiga Sarre caadiga ah.

Sababtoo ah saluug ka yimid xeerka SB 20, Golaha Waxbarashada Oregon waxa ay ansixiyeen si ku-meel-gaar ah in ay sii socoto taageeradii addeegyadii waxbarashada gaarka, laakiin xeerkanii wuxuu dhammaanayaan waqtigii uu sii shaqeyn lahaa bisha Luulyo 1deeda. Xeer Lambar SB 1522 ujeedadiisu waxa ay ahayd loo sameeyey in ay helaan gargaar joogta ah.

Lixda arday oo ka mid ah ardayda wax ka barata Dugsiyada Dadweynaha Portland ee hortagay golaha xeer dejintu waxa ay qaateen ama ay qaadan doonaan Shahaadadda Dib Loo Habeeyey, iyaga sii wadan doona inay ka helaan Barnaamijka Xaaladda-Kala-Guurka(CTP), barnaamijkaasi oo addeega danyarta dhammeeyey ugu yaraan afar sanno oo dugsi sarre ah. Markii ay ka hor caddeynayeen Golaha Xeer Dejinta Guddiisa Waxbarashada, waxa ay ka hadleen sida Barnaamijkan CTP u caawinayo nolosheedda sidii ay baran lahaayeen xirfado inta ay ku gudo jiraan xaalada kala guurka ee qaangaarnimada ilaa iyo inta ay ka noqonayaan dad aan cidna ku tiirsaneyn oo wax walba iyaga kaligood qabsanaya.

Micah Wright waxa ay u sheegtay xildhibaanada sida ay shaqooyinka ay soo qabatay ama ay haysato iminka ee bunka lagu iibiyo iyo makhaayada ay ku haggeen Kulliyada Waxbarashada Bulshada PCC barnaamijkeeda lagu barto cuntada, iyo sidii uu ku bartay inuu bulshada ula qabsan lahaa.

“Waxa aan ku bartay in aanan la murmin maamulka, iyada oo aan raacayo shuruucda oo aan ogahay waxa la iga rajeynayo marka aan ku suganahay meelaha kale,” ayuu yiri.

Spencer McNabb wuxuu isticmaala iPad isaga oo soo dhexmarinaya codkiisa marka uu ka hadlayo shaqooyinkiisa taasi oo ku sameysan karayo saaxiibo. “Sidii aan bulshada aan u baran lahaa anigu waxaan ku bartay qaab aniga ii gaar ah, ayuu yiri. Waa lagama maarmaan sidoo kale in ay dadku wax naga bartaan. Iskuulkeyga waa mid muhiim ii ah. Waad ku mahadsan tihiin ineydaan xirin.”

Luam Yhannes waxa ay tiri, waxa aan ka bartay sida loo noqdo qof u wanaagsan dadka ay ka wada shaqeeyaan shaqooyinka Salvation Army, Red Cross iyo Walgreen. Iyada iyo kuwa kale waxa ay ka wada hadleen sida ay muhiim u tahay sidii ay u barten sida loo isticmaalo gaadiidka dadweynaha ee Trimet-ka.

“Waxa aan bartay sida aan u raaco baska meelaha ay degan yihiin bulshadeydu,” ayey tiri. “Hadalkeygii sidii hore wuu ka soo fiicnaanayaan. Waxa aan yeeshay saaxiibo. Waxa aan bartay sidii aan nafteydu ugu doodi lahaa. Waalidiinteydu aad bay iigu hanweyn yihiin, iyada oo aniguna aan aad ugu faraxsanahay mustaqbalka.”

Xirfadaha ay baranayaan, ayey ardaydu yiraahdeen, waxa ay u ogolaan doonaan in ay u noolaadaan iyada oo ayna cidna ku tiirsaneyn, isla markaana ay go’aanada muhiimka ahna ay iyagu gaaraan.

“Xuquuqdeyda waan difaacan doonaa, ayuu yiri Ali Hasoon. “Haa xuquuqdeyda waan ilaalin doonaa iyada oo aan cid kale ay go’aanada nafteyda ii gaarin.”

Xildhibaanadu waxa ay ammaan u soo jeediyeen caddeymihii ay ka dhiibteen oo ay ka mid ahaayeen ereyadii Lorenzo Pizana iyo Samantha Omally.

“Waa arrin ku dhiirigaliya in aad aragto da’ yartan cajeebka ah ee mustaqbalkoodiina hor yaalo sababtoo ah waxa ay lahaayeen in ay helaan waxbarasho tayo leh, oo ay si aad ah uga soo shaqeeyeen sidii ay u heli lahayeen shahaadadahanii,” ayey tiri Sara Gelsner, oo ah xildhibaan Dimuquraadina ah oo laga soo doorto Corvallis. Waxa aad ku dadaaleysaan sidii aad uga shaqeyn lahaydeen sidii u diyaar u noqon lahaa barnaamijyadii xaalada-kala-guurka iyo sidii ayna dadka kale go’aanadiina ku saabsan noloshiina go’aan uga gaari lahayn. Dhammaan maanta waxaad farax galiseen sanadkeygii 2018 iyo in aan goobjoog ka ahaado dhegeysigan uu dhageysano golaha xildhibaanada gobolku.”

Xeerka lagu soo lifaaqay xaalad “Degdeg ah” sababta oo ah xeerkaa ku-meel-gaarka ahaa wuxuu dhammaanayaan bisha Luulyo, waxaana dib loogu ballamay in guddidu kulmaan todobaadkani.

*-Mike Tokito*